



Somali Federal Republic  
Federal Parliament  
Committee on Foreign Affairs & International Cooperation

Ref: 02/79/21

Date: 18/01/2021

Ku: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya,  
Ahna Taliyaha Guud ee Ciidamadda Qalabka Sida, Muqdisho – Soomaaliya.

Og: R/wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Muqdisho – Soomaaliya.

Og: Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS, Muqdisho – Soomaaliya.

Ujeeddo: Ciidamada Soomaaliyeed ee Tababarka ugu Maqan Wadanka Eretrea

M.ne Madaxwene,

Guddiga Arrimada Dibadda Golaha Shacabka BJFS isagoo gudanaya waajibaadkiisa Dastuuriga korjoogteyta hay'addaha Dowladda, tixgelinaya cabashooyin ka soo gaaray waalidiin caruurtooda tababar ciidan loogu qaaday Dalka Eretrea, waxaan kaa codsaneyna inaad noo cadeysa Ciidamada halkaa tababarka u jira tiradooda guud inta ay tahay, iyo goorta ay ku soo noqonayaan dalkooda hooyo.

Sidoo kale waxaa na soo gaaraya in waalidiin badan ay la'ayihiin caruurtoodii ayna soo gaartay in ay ku dhinteen dagaaladii ka dhacay Gobolka Tigreega iyaga oo garabsiinaya Ciidamada Dowladda Federaalka Ethiopia.

Sidaa darteed, waxaan kaa codsaneynaa inaad cadeysid halka ay ku sugar yihii dhalinyaradaas tababarka loo qaaday, lana xiriisid waalidiintooda. Wuxaan kale oon ka codsaneynaa in si degdeg ah loogu diro guddi dawladda iyo golaha shacabka ka kooban oo soo xaqiijiya noloshooda iyo geeridooda intaba.

Annaga oo ku kalsoon inaad nala wadaagi doonto cadeymo ay ku qancaan waalidiinta iyo ummada Soomaaliyeed, naga guddoon salaam Xushmad leh.

Guddoomiyaha Guddiga

M.ne Cabdulqaadir Cossoble Cali

